# STROKEHÄLSA

## Förbättra livet efter din stroke

Sidee ayuu kuu saameeyay maskax dhiig ku furankaagu/istarooggaagu?

Waxaad kulankaaga ka hor ka jawaabi doontaa 14 su'aalood oo la kala doordooranaayo oo ku saabsan dhibaatooyinka caafimaad ee maskax dhiig ku furanka ka dib caadiga ah. Waxaad haa ku jawaabi kartaa haddii ay saameyntu weyn tahay iyo haddii ay yar tahayba. Markaad su'aalaha ka jawaabto ayaad heli doontaa fursad aad kaga fikirto waxa muhiimka kuu ah inaad ka hadasho xilliga booqashada lagu jiro.

Ka fikir inaad sidoo kale heli doonto fursad aad jawaabahaaga ku faahfaahiso/balbalaariso markaad daryeel bixiyaha la hadlayso. Waxaad wadajir iskula qaadaneysaan nooca daryeel iyo baxnaanin adiga kugu haboon. Xitaa haddii qeybo badan oo nolosha ka mid ah ay isbeddeleen, ayaad badanaa fursad u leedahay inaad caafimaadkaaga saamayn ku yeelato.

Lambarka shakhsiga halkan ku qor:

### 1. Ka hortegaaya/baajinaaya maskax dhiig ku furanka cusub

**Miyaad dooneysaa inaad hesho waxyaalaha ku saabsan waxaad samayn karto si aad maskax dhiig ku furan cusub uga hortagto?**

In mar labaad loo jirado ayaa ah cabsi ay dad badan qabaan. Khatarta in maskax dhiig ku furan cusub kugu dhaco ayaa xoog u yaraaneysa iyadoo loo maraayo marka la isku dhex wado hab nololeed caafimaad leh, daawo qaadasho iyo kantaroolida/xakamaynta cadaadiska dhiigga.

☐ Haa (ja) ☐ Maya (Nej)

### 2. Waxqabadyada maalinlaha ah

**Miyey kugu adagtey inaad waxqabadkaaga maalinlaha ah sameyso ka dib marka uu maskax dhiig ku furankaagu kugu dhacay?**

Dad badan ayaa waxqabadka maalinlaha ah ee sida qubeysiga, labisashada, cunto karinta ama in dibada loo baxo dhibaatooyin badan kala kulma .

☐ Haa ☐ Maya

Strokehälsa har utvecklats inom Göteborgs Universitet i samverkan med strokeföreningen.
Frågorna baseras på Post-Stroke Checklistan som är ett standardiserat verktyg för uppföljning efter stroke. Revideras feb 2023.

## 3. Socodka iyo dhaqdhaqaaqa

**Miyay dhibaatooyin kaa haystaan inaad socoto ama aad dhaqdhaqaq u sameyso si sugan maskax dhiig ku furankaaga ka dib?**

Tixaa dhibaatooyinka khafiifka ah ee dheelitirka ayaa kor u qaadi kara khatarta inaad dhacdo. Waxa laga yaabaa inay dhibaatooyin kaa haystaan inaad dhaqdhaqaaqdo guriga dhexdiisa, tusaale ahaan inaad sariirta ka kacdo oo aad kurisiga ama musqusha aado. Xaalada meelaha gudaha ah ee ka sii adag, ayaa dadka qaarkood la kulmaan dhibaatooyin, tusaale ahaan inay bas raacaan ama meelaha aan sinnayn ku dul socdaan.

☐ Haa ☐ Maya

## 4. Murqaha ku giigsan iyo qalalka murqaha (Spasticitet)

**Miyaad dareemeysaa qalal ka sii kordhay oo murqaha, gacmaha iyo/ama lugaha maskax dhiig ku furankaaga ka dib?**

Dadka qaar ayaa dareema giigsanaan iyo qalal muruqyada. Waxa laga yaabaa inaad dareentay inay kugu adag tahay inaad dhaqdhaqaaqaaga xakamayso. Daaweynta ayaa ka hor tagi karta xanuun ama qalal oo sii wanaajinaysa fursada is baxnaaninta.

☐ Haa ☐ Maya

## 5. Xanuun

**Miyaad xanuun cusub dareemeysaa maskax dhiig ku furankaaga ka dib?**

Dadka qaar ayaa xanuun dareema maskax dhiig ku furanka dib. Waxa laga yaabaa inaad xanuun murqaha iyo kala goysyada/laabatooyinka ama madaxa ah dareento. Waxa jira noocyo kala duduwan oo xanuunka ah tusaale ahaan xanuunka neerfaha.

☐ Haa ☐ Maya

## 6. Kaadi haystaada iyo mindhicirka

**Miyey dhibaatooyin dheeraad ah kaa haystaan inaad xakamayso kaadi haystaada ama mindhicirkaaga maskax dhiig ku furankaaga ka dib?**

Dadka qaar waxay dareemaan dhibaatooyin waxyaabo ka dareeraaya oo aanay xakameyn karin, in aan kaadi haystu wada faaruqin ama inay adag tahay in la isku xejiyo ilaa inta musqusha la gaadhaayo. Waxa laga yaabaa inaad aragtey dhibaatooyin calool istaag ama shuban ah.

☐ Haa ☐ Maya

## 7. Wada xiriirka

**Miyay kugu adag tahay inaad dadka kale la xiriirto maskax dhiig ku furankaaga ka dib?**

Inaan la hadli karin ama aan lagu fahmi karin ayaa inta badan loo arkaa inay nolol maalmeedka caqabad ku tahay. Waxa laga yaabaa inay kugu adkaato inaad wax sheegto ama aad fahamto waxa dadka kale sheegayaan. Dadka qaar ayay ku adag tahay in ereyada qaar si cad ugu dhawaaqaan. Dadka kale waxa dhibaato ka haysataa in wax la akhriyo oo wax la qoro.

☐ Haa ☐ Maya

## 8. Xaaladda garashada/Caafimaadka dhimirka

**Miyay dareentaa walaac badan ama diiq badan maskax dhiig ku furankaaga ka dib?**

Waxay dad badani dareemaan niyad jab, u nuglaanta/dulqaadasho la'aanta istareeska, welwelka iyo jewigooga/niyadooda oo is bedbedesha maskax dhiig ku furanka ka dib. Xaalado aad u xun ayaa niyad jab keeni kara, taas oo ah xaalad caafimaad oo ay tahay in la daaweeyo.

☐ Haa ☐ Maya

## 9. Garashada

**Miyay kugu adag tahay inaad fikirto, ahmiyada wax saarto ama wax xusuusato maskax dhiig ku furankaaga ka dib?**

Dadka qaar ayay dhibaatooyin ka haystaan inay wax bilaabaan, inay wax ka badan hal shay markiiba sameeyaan oo ay dhibaatooyinka kala duwan xalliyaan. Waxa laga yaabaa inaad dareentey inay xaaladaha kala duwan kartidu kala duwan tahay. Waxqabadyada caqabada noqon kara waa in wax la akhriyo, biilasha la bixiyo oo balamaha la qabsadey la xusuusto.

☐ Haa ☐ Maya

### Miyey taasi xaddidaysaa ka qeybqaadashadaada waxqabadyada?

Dad badan ayaa dareemaaya inay siyaabo kala wanaagsan u sameyn karaan hawlo fikir u baahan oo kala duwan iyadoo xaaladaha ku xiran. Waxa laga yaabaa inaad u baahato inaad nasato ama marar badan qadar yar oo nasasho ah qaadato si aad awood ugu yeelato inaad firfircoonaato maalinta oo dhan firfircoonaato. ☐ Haa ☐ Maya

## 10. Nolosha maskax dhiig ku furanka ka dib

**Miyaad dareemeysaa inay adag tahay inaad waxyaabo muhiim kuu ah samayso maskax dhiig ku furankaaga ka dib?**

Dad badan ayaa dareemaaya dhibaatooyin ku xeeran tusaale ahaan waqtiga firaaqada, shaqada, galmada iyo wada noolaanshaha iyo sidoo kale waqti lala qaadanaayo asxaabta iyo qoyska. Waxa laga yaabaa inaad dareento kalsooni darro ku wajahan ku laabashada waxqabadyadii aad samayn jirtey maskax dhiig ku furankaaga ka hor. Dadka qaar waxay dareemayaan daal sii kordhay. Waxa dhib yaraan karta in wax kasta faraha lagala baxo oo aan laga qeybqaadaan waxqabadyadii hore.

☐ Haa ☐ Maya

## 11. Xiriirka qoyska

**Miyaa xiriirka qoyskaagu uu noqday mid ka sii adag ama welwel badan maskax dhiig ku furankaaga ka dib?**

Noloshu badanaa waa ay is bedeshaa maskax dhiig ku furanka ka dib taada iyo ta dadka aad jeceshahayba.

☐ Haa ☐ Maya

## 12. Caafimaadka afka

**Miyay kugu adag tahay inaad nadaafadda afkaaga daryeesho maskax dhiig ku furanka ka dib?**

Dadka qaar ayay kaga sii adag tahay inay ilkaha ama ilkaha sadafka ah cadeydaan. Xaaladda ilkaha ee sii xumaanaysa maskax dhiig ku furanka ka dib waxa sababi kara dhowr arimood oo kala duwan iyadoo loona baahan yahay in la baaro.

☐ Haa ☐ Maya

## 13. Wax cunista oo wax liqista

**Miyey kaaga adag tahay inaad wax cunto ama wax liqdo maskax dhiig ku furankaaga ka dib?**

Dad badan ayay kaga sii adag tahay wax calalinta iyo inay si fudud wax u mariyaan cunahooda maskax dhiig ku furanka dib. Waxa laga yaabaa inaad wax ka sii badan qufaceyso markaad wax cuneyso ama wax cabeyso? Dadka qaarkood way ku adag tahay inay nafaqo ku filan helaan.

☐ Haa ☐ Maya

______________________________________________

______________________________________________

## 14. Dhibaatooyinka kale

**Miyaad carqalado kale la kulantaa maskax dhiig ku furankaaga ka dib, kuwaas oo ka soo kabashadaada saameeya ama dhibaatooyin kuu keena?**

Cawaaqibka maskax dhiig ku furanka ka dib timaada ayaa siyaabo kala duduwan u muuqan karta oo mudo ka dibna kala duwanaan karta. Wax walba foomkan laguma soo darin. Marka wadahadalka lagu jiro ayaad soo qaadi kartaa su'aalahaaga ama haddii ay jiraan wax aad walwal ka qabtid.

☐ Haa ☐ Maya

______________________________________________

______________________________________________

**Miyey jirtaa wax dheeraad ah oo aad rabto inaad booqashadaada daryeelka caadimaadka ka hor sheegto?**

______________________________________________

______________________________________________

______________________________________________

______________________________________________

**Miyaad leedahay wax waxqabadyo baxnaaninta oo la xiriira maskax dhiig ku furankaaga hadda?**

Waxa halkan loola jeedaa haddii aad hesho caawimo si tababarka loogu waafajiyo sida ku saleysan baahiyahaaga, iyadoo ay ku taageerayaan shaqaalaha baxnaanintu. Waxay noqon kartaa tabobar shakhsi ahaaneed, mid koox ahaaneed ama barnaamij tabobar oo iskaa aad sameynayso.

☐ Haa ☐ Maya

Strokehälsa har utvecklats inom Göteborgs Universitet i samverkan med strokeföreningen.
Frågorna baseras på Post-Stroke Checklistan som är ett standardiserat verktyg för uppföljning efter stroke. Revideras feb 2023.

STROKEHÄLSA

Förbättra livet efter din stroke

**Ayaa ka jawaabay su'aalahan foomka?**

- ☐ Aniga kaligey
- ☐ Aniga oo kaashanaaya qaraabada ama shaqaalaha daryeelka
- ☐ Kaliya qaraabada
- ☐ Wax kale

## Markaad taageero sax ah hesho ayaad saameyn kartaa caafimaadkaaga

Waxaad booqashada daryeelka caafimaadka aad adiga iyo daryeel bixiyahu ka wada hadli kartaan waxaad adigu samayn karto iyo nooca taageerada aad daryeel bixiyayaasha kala duwan ka heli karto. Daryeel bixiyahaaga ayaa leh aqoon guud oo ku saabsan maskax dhiig ku furanka, laakiin adiga ayaa khabiir ku ah dhibaatooyinkaaga caafimaadka iyo xaaladdaada. Wadajir ayaa daryeel bixiyeyaasha, qaraabada iyo dadka muhiimka ah ee taageerada ku siinaaya aad ka qeybqaadan kartaan oo aad mas'uuliyad wadareedka caafimaadkaaga yeelan kartaan.

Haddii aad leedahay qorshe daryeel oo aad daryeel caafimaad bixiye hore la laheyd ayaad taasi u soo qaadan kartaa booqashadaada. Markaad fikradahaaga la wadaagto daryeel caafimaad bixiyahaaga ayaa daryeel bixiyahu kaa caawin karaa inaad daryeelka ku saleyso baahiyahaaga.

STROKEHÄLSA

Förbättra livet efter din stroke

## Markaad taageero sax ah hesho ayaad saamayn ku yeelan kartaa/wax ka badeli kartaa caafimaadkaaga

Markaad macluumaadkan akhrisato ayaad booqashadaada daryeelka horteed isku sii diyaarin kartaa. Ka fikiri qodobada adiga ku saameynaaya.

Waxaad booqashada daryeelka caafimaadka aad adiga iyo daryeel bixiyahu ka wada hadli kartaan waxaad adigu samayn karto iyo nooca taageerada aad daryeel bixiyayaasha kala duwan ka heli karto. Daryeel caafimaad ka bixiyahaaga waxa uu leeyahay aqoon guud oo ku saabsan maskax dhiig ku furanka, laakiin waxaad adigu khabiir ku tahay dhibaatooyinka caafimaadkaaga iyo xaaladdaada.

Xusuusnow in ka soo roonaanshahu/wanaagsanaantu ay muddo dheer dhici karto maskax dhiig ku furankaaga ka dib.

### 1. Ka hortagaaya/baajinaaya maskax dhiig ku furan cusub

Khatarta in maskax dhiig ku furan cusub kugu dhaco ayaa aad u yaraaneysa iyadoo loo maraayo hab nololeed caafimaad leh, daawo qaadasho iyo kantaroolida/xakamaynta cadaadiska dhiigga. Waxaad adigu saamayn kartaa adigoo noqonaaya mid jir ahaan firfircoon, cunto caafimaad leh cuna, iska joojiso sigaarka iyo dhimista cabbitaanka khamriga.

In la bedelo caadooyinka nolosha ayaa wakhti qaadan kara oo marmarka qaarkood u baahan kara caawimo. Baahidaada kala hadl dhakhtarkaaga ama kalkaalisadaada.

### 2. Waxqabadyada maalinlaha ah

Way kugu adkaan kartaa in nolosha la maareeyo maskax dhiig ku furanka ka dib. Dadka intooda badan waxay ku caafimaadaan inay dib u bilaabaan hawlihii ay hore u sameyn jireen.

Marmarka qaarkood waxaad u baahan kartaa inaad hawlahaaga/waxaad qabanayso u sameyso hab adiga kugu haboon. Waxaad taageero ka heli kartaa qofka dadka ka caawiya dhaqdhaqaaqa iyo tababarka xubnaha jidhka kaas oo tallo ku siinaaya, tababar iyo qalab si aad nolol maalmeedka ugu maareyso.

### 3. Inaad socoto oo aad dhaqdhaqaaq sameyso

Dadka qaarkood ayay maskax dhiig ku furan ka dib dhibaato ka haysataa socodka iyo sameynta dhaqaaqa. Ka soo roonaanshahu muddo dheer ayuu qaadan karaa. Waxaad ku tababaran kartaa socodka iyo dheelitirka si aad si ka fudud ugu dhaqaaqaado oo aad halista dhicitaanka ugu dhinto. Aaladaha ayaa sidoo kale kuu fududayn kara.

Ka fikir adiga hadafkaaga gaarka iyo sida aad jidh ahaan dhaqdhaqaaq kugu habboon ugu sameyn karto. Waxaad taageero ka heli kartaa dhakhtarka murqaha ama kooxda baxnaaninta.

Strokehälsa har utvecklats inom Göteborgs Universitet i samverkan med strokeföreningen.
Frågorna baseras på Post-Stroke Checklistan som är ett standardiserat verktyg för uppföljning efter stroke. Revideras feb 2023.

## 4. Murqaha ku giigsan iyo qallalka murqaha (Spasticitet)

Dadka qaarkood waxay yeelan karaan giigsanaanta murqaha oo sii korodhay oo keeni doonta xanuun iyo qallal madax dhiig ku furanka ka dib. Haddii ay dhibaato ku haysato ayaa baxnaanintaada la fududayn karaa adigoo tallo iyo daaweyn helaaya.

Waxaad heli kartaa taageero qofka lagu saleeyey sida tusaale ahaan dhakhtarka murqaha ama kooxda baxnaaninta. Waxa uu dhakhtarkaagu kaa caawin karaa sameynta baaritaano dheeraad ah wuxuuna kuu soo jeedin doonaa tallaabooyinka ku habboon.

## 5. Xanuunka

Dadka qaar ayaa xanuun dareema maskax dhiig ku furanka ka dib. Haddii aad xannuun leedahay ayaad u baahan kartaa caawiyo aad baaritaan sababta ugu sameyso si aad daaweyn sax ah ugu hesho.

Dhakhtarka muruqyada ama dhakhtarka ayaa baaritaan sameyn kara isagoo tallaabooyin ku habboon soo jeedinaaya. Waxaad taageero ka heli kartaa dhakhtarka murqaha haddii xanuunku ku xiran yahay dhibaatooyin murqaha ama kalagoyesyada ah.

## 6. Kaadi haysta iyo mindhicirka

Dadka qaarkood way ku adag tahay inay isku xejiyaan kaadida oo ay suuliga ka gaaraan maskax dhiig ku furanka ka dib. Waxa laga yaabaa inaad dareentey dhibaatooyin calool istaag ama shuban ah. Haddii ay dhibaato ku haysato ayaad xiriir la sameyn kartaa rugtaada caafimaadka .

Waxaad taageero iyo macluumaad ka heli kartaa kalkaaliso leh aqoon ku saabsan isku ceshi la'aanta kaadida ee maskax dhiig ku furanka ka dib. Waxaa jira aalado wanaagsan oo kuu fududeyn kara nolol maalmeedka.

## 7. Wadahadalka

Waxay dadka qaarkood dareemaan inay ku adkaatay inay wadahadal sameeyaan maskax dhiig ku furanka ka dib. Hadalku badanaa wuu ka soo roonaadaa muddo dabadeed iyadoo dadka badankiisu bartaan inay nolol maalmeedkooda maareeyaan. Hal hab oo lagu maareyn karo ayaa noqon karta in dad ka tiroyar lala hadlo isla markiiba ama si ka degdeg yar loo hadlo.

Haddii aad dhibaatooyin kaa haystaan ayaa khabiirka caawiya dadka ay dhibaatadu ka haysato xagga codka iyo hadalka uu baaritaan ku sameyn karaa, daaweyn karaa, oo ku taageeri karaa markaad la qabsaneyso oo aad isku dayi kartaa aaladaha isgaarsiinta. Haddii aad rabto inaad hesho macluumaad dheeri ah iyo taageero, ayaad xitaa la xiriiri kartaa Afasiförbundet.

Strokehälsa har utvecklats inom Göteborgs Universitet i samverkan med strokeföreningen.
Frågorna baseras på Post-Stroke Checklistan som är ett standardiserat verktyg för uppföljning efter stroke. Revideras feb 2023.

## 8. Xaaladda garashada/Caafimaadka dhimirka

Dad badan waxay dareemaan in caafimaadkooda dhimirka ay saameyn soo gaarto maskax dhiig ku furanka ka dib. Haddii ay dhibaato kaa haysato, wax qabadyada joogtada ee maalinlaha ah, socodka iyo inaad qof u sheegto sidaad dareemeyso ayaa kaa caawin karta inaad ka wanaagsanaato.

Haddii aad dhibaatooyin ka waaweyn leedahay ayaanay aheyn inaad sugto in caawimo aad raadsado. La hadal dhakhtarkaaga, kalkaalisadaada ama dhakhtarkaaga cilmi nafsiga. Waxa dhibaatooyinka lagu yareyn karaa daaweyn caafimaad ahaan iyo taageero wada hadal. Haddii la dareemaayo inay arin degdeg ah tahay ayaad markaas la xiriiri kartaa sjukvårdsupplysningen, 1177 ama 112.

## 9. Garashada

Dad badan ayaa laga dareemaa dhibaatooyin la xiriira, tusaale ahaan, xusuusta iyo ahmiyad wax saarista marka lagu laabto waxqabadyadaadii maalinlaha aahaa. Haddii aad dhibaatooyin dareento ayaad badanaa heli kartaa hab cusub oo waxqabadyada loogu sameeyo.

Jewi xasilloon iyo in markiiba hal shay uun la qabto ayaa kuu sahli kara. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa qallabka farsamada si aad si ka wanaagsan ugu maareyso nolol maalmeedkaaga. Waxaad taas kala hadli kartaa kooxda baxnaaninta ama dhakhtarkaaga oo ku sii gudbin kara.

## 10. Nolosha maskax dhiig ku furanka ka dib

Adiga ayaa og sida ugu fiican ee aad ugu noolaan karto si aad si wanaagsan u dareento. Mararka qaarkood aay la helaa waxyaabo cusub oo la xiiseynaayo maskax dhiig ku furankaaga ka dib. Ka qeybqaado kooxaha taageerada ama urur bukaan, tusaale ahaan Stroke-Riksförbundet, Afasiförbundet ama Neuroförbundet. Waxay kaa caawin karta inaad hubiso inaadan keli ahaanin.

Haddii aad qorshaynayso inaad dib ugu laabato shaqada ayaa iskuduwaha baxnaaninta ama dhakhtarkaagu kaa caawin karaa qorsheynta iyo xiriirada ku haboon. Haddii aad dhibaatooyin waaweyn oo daalka ah leedahay ayaad u baahan kartaa qiimeyn shaqsi ahaaneed si aad sababta ugu ogaato. Kooxda baxnaaninta ayaa kaa caawin karta sidii aad u heli lahayd habab aad nolol maalmeedkaaga ugu fududayn lahayd.

STROKEHÄLSA

Förbättra livet efter din stroke

## 11. Xiriirka qoyska

Waxay dad badan u jirashada maskax dhiig ku furan ka dhigan tahay isbeddel xagga nolosha ah. Waxa jira taageerada qaraabada oo kamuun kasta laga helaayo taas oo noqon karta kaalmo wanaagsan. Markaad ka qeybqaadato koox taageero ayaa adiga iyo qoyskaagu la kulmi kartaan dadka kale ee ku jira xaaladaada mid la mid ah waxaadna hubineysaan inaydaan keli ahayn.

Ururada dadka bukaanku waxay noqon karaan taageero wanaagsan, tusaale ahaan Stroke-Riksförbundet, Afasiförbundet ama Neuroförbundet. Mararka qaarkood ayaa qof qaraabo ah kuu raaci kara booqashada daryeelka caafimaadka si loogu helo macluumaad iyo jawaab iyaga su'aalahooda ah.

## 12. Caafimaadka afka

Khatarta in suus ku galo ayaa kordhi karta maskax dhiig ku furanka ka dib. Waxaad suuska ka hortagi kartaa adigoo u maraaya nadaafadda afka oo wanaagsan. Waxa fiican in ballan dhakhtarka ilkaha laga qabsado dhawr bilood maskax dhiig ku furankaaga ka dib. Haddii ay dhibaato caafimaadkaaga ilkaha kaa haysato ayaad weydiisan kartaa taageero daryeelka caadimaadka oo gaar ah.

## 13. Wax cunista oo wax liqista

Waxa muhiim ah inaad nafaqo hesho si si ka wanaagsan looga soo kabto. Waxaad heli kartaa tallo wanaagsan ama waxa ku sii gudbin karta kalkaalisadaada.

Haddii ay kugu adag tahay inaad wax liqdo ayaa khabiirka dadka ka caawiya dhibaatada xagga codka iyo hadalka uu tallo ku siin karaa. Marka la isticmaalo farsamada fududeynta iyo la qabsi liqidda ayaa wax liqista laga dhigi karaa mid ammaan ah.

## 14. Dhibaatooyinka kale

Dadka waxa siyaabo kala duwan u saameeya maskax dhiig ku furanka. Badanaa dhibaatooyinku waxay noqon karaan qaar bay'ada ka dahsoon. Markaad adiga su'aalahaaga soo qaado ama waxa aad ka welwalsan tahay, ayaad si ka sahlan taageero ugu heli kartaa.

## Markaad taageero sax ah hesho ayaad saameyn ku yeelan kartaa caafimaadkaaga

Wadajir ayaa daryeel bixiyeyaasha, qaraabada iyo dadka muhiimka ah ee taageerada ku siinaaya aad uga wada qeybqaadan kartaan oo aad mas'uuliyad wadareedka caafimaadkaaga yeelan kartaan.

Haddii aad leedahay qorshe daryeel oo aad daryeel caafimaad bixiye hore la laheyd ayaad taasi u soo qaadan kartaa booqashadaada. Markaad fikradahaaga la wadaagto daryeel caafimaad bixiyahaaga ayaa daryeel bixiyahu kaa caawin karaa inaad daryeelka baahiyahaaga ku saleyso.

Strokehälsa har utvecklats inom Göteborgs Universitet i samverkan med strokeföreningen.
Frågorna baseras på Post-Stroke Checklistan som är ett standardiserat verktyg för uppföljning efter stroke. Revideras feb 2023.